



Magaalada Seattle mashruuceeda qaabilsan wajahada biyaha ayaa isbadal ku samayn doonta wajahada biyaha ee bartamaha Seattle si loogu sameeyo wajahad biyo dadka oo dhan iyadoo laga qaadayo jidka Alaskan Way Viaduct sanadka 2019. Wajahada biyaha ee cusub waxay muujin doontaa beeraha, bilicda, farshaxanka dadwaynaha, munaafacaadaka deegaanka, jidka socodka, wadooyinka iyo jidka baaskiilka ee isku xira bilowga Belltown ilaa Pioneer Square.

Wajahada biyaha ee mustaqbalku waxaa ku Jiri doona:

- Alaskan way oo dib loo dhisay iyo Elliott Way cusub oo u adeegi doona noocyada kala duwan ee safarka isagoo leh meesha dadku jidka ka gudbaan oo la arki karo badbaadana leh iyo nalka isgoyska.
- Jidka socodka oo balaaran, cawska oo la qurxiyey, iyo jidka baaskiilka oo laba qaybood leh oo dhinac socda biyaha looguna talagalay qoysaska iyo dadka shaqada u socdaba inay ku raaxaystaan.
- Beerta dakada oo dib loo dhisay si dadku ugu socdaan uguna raxaysatan muqaalka iyo in ay biyaha tagi karaan. Waxaa la furayaa dabayaaqada 2019!
- Si buuxda oo loo mari karo jidka socodka ee isku xira Pike Place Market iyo wajahada biyaha, iyadoo ay ku jirto meelaha cunada, adeega, iyo nasashada.
- Jidadka socodka ee Pioneer Square, ee la siman Pike iyo Pine streets, jidadka bariga ama galbeed inta u dhaxaysa Alaskan Way iyo Western Avenue oo la sii wanaajiyey.

BARO DHEERAAD

www.waterfrontseattle.org

info@waterfrontseattle.org | 206.499.8040

 Waterfront Seattle   @WaterfrontSEA






DHISMAHA MUSTAQBALKA

Shaqada wajahada biyuhu waxay bilaabatay 2017 iyadoo lagu bilaabay dhismaha dakada 62. Xagaaga 2019, waxaa bilaabmi doona dhismaha Alaskan Way, marka laga qaado Viaduct.

JADWALKA DHISMAHA

■ Wajahada biyaha Seattle
■ Mashruucyo La xariira



Fiiro: Jadwalka dhismuhu wuu is badali karaa.



Ka warhay dhismaha wajahada biyaha adigoo iska diiwaan galinaya email ka usbuuc laha ah website kan.

www.waterfrontseattle.org/construction

BARO DHEERAAD

www.waterfrontseattle.org

info@waterfrontseattle.org | 206.499.8040

Waterfront Seattle



@WaterfrontSEA

